



**KA DHIG
CODKAAGA**

MID QIIMO LEH

MAXAA LOO CODEEYAA

Maxaan u codeeyaa? Waxaad caawin kartaa sidii looga samayn lahaa isbeddello muhiim ah maamulka magaaladaada, gobolka, iyo waddanka oo dhan.

Codayntaydu qarsoodi ma tahay? Haa, codayntaadu waa qarsoodi. Qofna ma ogaanayo sidaad u codaysay haddii aadan u sheegin.

Yaa codayn kara? Waa inaad marka hore is diiwaangeliso si aad u codayso. Maine waxaad codayn kartaa haddii aad:

- Tahay muwaaddin Maraykan ah
- Deggen tahay Maine
- Tahay 18 jir ama ka weyn

Waa goorma Maalinta Doorashadu?

- Maalinta Doorashada Guud waa Talaaadada ka danbaysa Isniinta u horreysa bisha Noofembar.
- Maalinta Doorashada hordhaca ah waa Salaasada labbaad taas oo Maarso ama Juun ah, iyaddoo ku xidhan sanadka.
- Mararka qaar doorashada is-reereebka ah iyo tan guud waa la isku daraa doorashooyinka magaalada.
- Doorashooyinka Magaaladu waxay dhici karaan wakhtiyo kale waxana go'aansada magaalada.

Maxaan u codbixin doonaa? Waxaad dooraan kartaa dadka u ordaya doorashada is-reereebka. Waxad dooran kartaa dad u shaqeeya dadweynaha. Waxaad bixin kartaa cod haa ama maya.

- Afti — Waxaad dooran kartaa in sharci loo ansixiyo.
- Deyn — Waxaad dooran kartaa mashaariicda uu gobolku dayn ku hirgelin karo.
- Isbeddel Dastuurka ah — waxaad dooran kartaa isbeddel dastuurka ah oo uu soo jeediyey baarlamaanku.

ISU DIIWAANGELINTA CODAYNTA

Sideen isu diiwaangeliyaa si aan u codeeyo? Waxaad isu diiwaangelin kartaa inaad codayso Maine haddii:

- Aad tahay 18 jir ama ka weyn oo muwaaddin Marayka ah, degenna Maine.
- Aad tahay 17 jir noqon doonaa 18 maalinta doorashada. Waxa markaas la oggol yahay inaad codayso doorashada hore ee Juun.
- Haddii aad tahay 16 jir ama ka weyn, waad isa sii diiwaangelin kartaa si ay diiwangelintaadu diyaar u noqoto markaad gaarto da'da codbixinta.
- Lagugu helay danbi. Haddii aad ku jirto xabsi, waxad iska diiwaangelin kartaa magaaladaad ku noolayd intaadan xabsiga galin, waxaanad diri kartaa codayntaada.
- Xataa haddii aadan lahayn guri rasmi ah, waad isu diiwaangelin kartaa codaynta.

Waxaad isu diiwaangelin kartaa inaad ka codayso gobolka Maine adigoo:

- Onlayn ahaan: Waxaad u baahan doontaa inaad soo gudbiso diiwaan gelintaada saddex todobaad ka hor Maalinta Doorashada markaas Karaanigaaga Magaaladu waxa uu haysataa wakhti lagu habbeeyo codsiga. Isa diiwaan geli si aad u codayso onlayn ahaan: <https://registertovote.sos.maine.gov/>
- Ku diraya diiwaangelinta boostada. Waa in foomkaagu soo gaaro karraaniga magaalada talaadada ka hor 3 usbuuc doorashada.
- Adigoo taga: Meelaha la iska diiwangeliyo; Xafiiska Adeegga Gaadiidka, Xafiiska dowladda hoose, ama goobta codaynta Maalinta Doorashada.

- Markaad hesho liisanka gaadhi wadista ama kaarka aqoonsiga, Waaxda Gaadiidku si toos ah ayey kuugu diiwaangelin doontaa.

Haddii aadan joogin Hay'adda Gaadiidka, waxa lagu weydiin doonaa inaad kaar buuxiso:

- Waxaad u baahan doontaa inaad tusto caddeynta cinwaanka aad daggan tahay.
- Aqoonsiyo badan oo kala duwan ayaa la aqbalayaa, sida aqoonsiga ardayda, Aqoonsiga qabaa'ilka, Aqoonsiga Gobolka, iyo Aqoonsiga Baasboorka.
- Warqad boostada ku timid ayaa ku filan inaad caddayso cinwaankaaga.
- Haddii aadan xataa deegaan rasmi ah waxaad iska diiwaan gelin kartaa magaalada aad ku nooshahay.
- Haddii aad xiran tahay, waxa cinwaan kuu noqonaysa magaalada aad ku noolayd intii aan lagu xirin.

Waa inaad buuxiso kaarka is-diiwaangelinta (fiiri bogga 4-7). Waa inaad buuxiso bogga hore iyo gadaal ee kaarka:

- Saxeex kaarka, taariikhdana ku dhig.
- Khasab ma aha inaad ku biirto xisbi siyaasadeed si aad u codayso. Haddii aadan rabin inaad ku biirto xisbi siyaasadeed, sax "Unenrolled" (Xisbi aan ku jirin) kaarka dushiisa.
- Wixii faahfaahin dheeraad ah, booqo:
maine.gov/sos/cec/elec/voter-info/voterguide.html

Waa maxay xisbi siyaasi ah? Xisbi siyaasi ahi waa koox dad ah oo wadaaga fikir sida dowladdu u shaqayn lahayd. Markaad isu diiwaangelinayso codaynta, waxaad ku biiri kartaa xisbi siyaasi ah. Waana bilaash.

Waxad baddali kartaa xsbigaad hore uga mid ahayd. Tusaalooyin xisbiyada siyaaga ah waxay ku qoran yihiin "Party Affiliation" (Xisbigaad ka tirsan tahay) hoosteeda, bogagga 8-9 ee kaarka Diiwaangelinta.

KAARKA DIIWANGELINTA

MAINE VOTER REGISTRATION APPLICATION

Federally required questions:

1 • Are you a citizen of the United States of America? * YES NO
 *If NO, DO NOT complete this application.

• Are you at least 18 years of age? ** YES NO
 **If NO, are you at least 16 years of age to pre-register? YES NO

PARTY AFFILIATION

2

Democratic
 Green Independent
 Libertarian
 No Labels
 Republican
 Unenrolled (no party choice)

3	LAST NAME (and suffix, if any)	FIRST NAME	MIDDLE NAME	DATE OF BIRTH
				MM - DD - YYYY
CURRENT RESIDENCE ADDRESS (Physical address where you live)				
5a	STREET NAME AND NUMBER, <u>NOT</u> A P.O. BOX		CITY, TOWN, PLANTATION OR TOWNSHIP	
CURRENT MAILING ADDRESS (Complete if different from above address)				
5b	STREET NAME AND NUMBER, OR P.O. BOX, etc.		CITY/TOWN	ZIP CODE
5c	Have you previously been registered to vote? <input type="checkbox"/> YES <input type="checkbox"/> NO If "YES", provide previous registration information below.			TELEPHONE (Optional)
	CITY/TOWN	COUNTY	STATE	

COMPLETE BOTH SIDES OF THIS CARD - PLEASE PRINT



Isticmaal QR code ka telefoonkaaga si aad u hesho codsiga isudiiwangelinta codaynta.

Kaarka Diiwaangelinta Codbixiyaha | TILMAAMO

- 1 KA JAWAAB LABA SU'AALOOD.** Waa inaad labadaba uga jawaabto "haa" si aad isu diiwaangeliso.
- 2 XISBIGA.** Doorro mid ka mid ah liiska: Xisbi Maine laga aqoonsaday, Xisbi ku guda jira aqoonsiga, ama doorro "Xisbi kuma jiro".
- 3 MAGACA.** Magaca Awowga iyo Magacaaga, ama Xarafka u horreeya magacaaga iyo Magaca Aabbahaa.
- 4 TAARIKHDA DHALASHADA.** Waa inaad tahay 18 jir Maalinta Doorashada si aad u codayn karto.
- CINWAANKA.**
- 5a Cinwaaka Guriga aad Deggen Tahay:** Jidka ama goobta aad ku nooshahay (Oo aan ahayn Sanduuq Boosto)
- 5b Cinwaankaaga Boostada:** Waa haddii uu ka duwan yahay ka aad daggan tahay (Wuxuu noqon karaa Sanduuq Boosto)
- 5c Cinwaaankaagii Hore:** Haddii aad hore u diiwangashanayd oo aad guurtay waa inaad "haa" dhahdo si aad u sheegto magaaladii, degmadii iyo gobolkii hore.

KAARKA DIIWANGELINTA

MAINE VOTER REGISTRATION APPLICATION

- COMPLETE BOTH SIDES OF THIS CARD -

<p>CHANGE OF NAME (Prior legal name, if applicable)</p> <p>LAST _____ FIRST _____ MIDDLE _____</p> <p>SIGN AND DATE THIS CARD. I certify that all the information I have provided on this form is true.</p> <p>6 Signature of Applicant on line above Date on line above _____</p>	<p>VOTER ID: By federal law, NEW Maine voters must provide an applicable ID number as follows:</p> <p>7a 1. Your Maine driver's license/Maine State ID; or</p> <p>7b 2. The last 4 digits of your Social Security number (ONLY if you don't have a Maine driver's license/Maine State ID); or</p> <p>7c 3. Write "none" ONLY if you don't have either 1 or 2</p> <p>_____</p>
	<p>REGISTRAR'S USE ONLY: Date Received: _____ Ward-Precinct: _____</p> <p>Source of Registration: <input type="checkbox"/> In Person <input type="checkbox"/> By Mail <input type="checkbox"/> Agency <input type="checkbox"/> BMV <input type="checkbox"/> Voter Registration Drive/3rd Person</p> <p>Type of Registration:</p> <p><input type="checkbox"/> NEW Maine Voter Registration Form of Proof for ID: _____ for Residency: _____</p> <p><input type="checkbox"/> Change of Existing Voter Registration (check boxes below) Form of Proof for Residency: _____</p> <p><input type="checkbox"/> Address Change to new municipality <input type="checkbox"/> Address Change within municipality <input type="checkbox"/> Party Enrollment Change</p> <p><input type="checkbox"/> Name Change <input type="checkbox"/> Other Change _____</p> <p><input type="checkbox"/> Duplicate Application (no changes made)</p>
<p>INSTRUCTIONS TO VOTERS: Failure to complete this entire application may prevent registration.</p> <p>8 Deliver or mail this completed card to your municipal registrar or to the Division of Elections, #184 State House Station, Augusta, ME 04333-0101. This properly completed application must be received by the municipal registrar 21 days or more before an election. If less than 21 days before an election, you must register in person.</p> <p>7 If you are a NEW Maine voter and mail this card, you must include a photocopy of your Maine driver's license, Maine State ID, or current utility bill, bank statement or government document that shows your name and address</p> <p>For election information, call 207-624-7650 or visit www.maine.gov/sos/cec/elec/ (rev. 1/24)</p>	



Isticmaal QR code ka telefoonkaaga si aad u hesho codsiga isudiiwangelinta codaynta.



Kaarka Diiwaangelinta Codbixiyaha | TILMAAMO

- 6 Saxeexa Codbixiyaha.** Waa inaad saxeexdo taariikhdana ku qorto.
- 7a Aqoonsiga Codbixiyaha.** **Lambarka Liisanka Baabuurka ama Aqoonsiga Maine:** Codbixiyeyaasha cusub ee haysta mid kuwan ka mid ah waa inay lambarradan midkood qoraan.
- 7b Lambarka Caymiska Bulshada (Sooshal Sekuuriti "SSN"):** Codbixiyeyaasha cusub oo aan haysan liisanka ama aqoonsiga Maine waa inay qoraan afarta lambar ee ugu danbeeya Soosalka (SSN).
- 7c Midna:** Kaliya codbixiyeyaasha aan haysan liisanka ama aqoonsiga Maine ayaa ku qori kara "None" (Midna).
- 8 Diiwaangelin Boostada lagu Diro:** Codbixiyeyaasha cusub ee diiwaangelinta ku soo dira boostadu, waa inay soo raaciyaan sawirka aqoonsiga (Sida liisanka dirawalka), kaarka is-diiwaangelinta iyo dukumenti muujinaya halka ay daggan yihiin.

XISBIYADA SIYAASIGA

Xisbiyada Siyaasiga ah ee Maine: Codbixiyeyaal badani waxay doortaan inay ku biiraan xisbi siyaasi ah. Maine waxay leedahay shan xisbi oo siyaasadeed oo xaq u leh doorashada : Xisbiga Demoqraadiga, Xisbiga Cagaarka ah, Xisbiga Libertarian-ka ah, Xisbiga aan Magaca LahaynNo Labels, iyo Xisbiga Jamhuuriga ah. Waxa kale oo jira xisbiyo kale oo yaryar oo ay cod bixiyeyaashu ku biiri karaan. Xisbiyadan yaryari kuma jiraa kaarka codaynta, walina ma gaarin laxaad ay ku qabtaan is-reereebka xisbiyada. Liiska xisbiyada loo aqoonsado in loo codeyn karaa way is badbaddalaan iyadoo ay ku xiran koroka iyo sii yaraanta xisbiyada.

Doorashada Is-reereebka Xisbiyada: Xisbiyada siyaasiga ahi waxay door khaas ah ku leeyihiin doorashooyinka qaarkood, gaar ahaan kuwa Madaxweynaha, Guddoomiyaha Gobolka, iyo Golaha Xildhibaanada ee Qaranka iyo kuwa Gobolka. Xafiisyadaasi dhab ahaan waxay leeyihiin laba doorasho—Doorashada Is-reereebka iyo ta guud. Xisbi siyaasadeed oo kastaa wuxuu qabtaa doorashada is-reereebka si ay u go’aan sadaan ciddii xisbiga ku matali lahayd doorashada guud. Marka xisbi siyaasi ahi uu qabto doorashada is-reereebka ah, dadka xubnaha ka ah xisbiga oo kaliya ayaa ka qayb qaadan kara. Doorashooyinka dowladaha hoose iyo dagmooyinka qaarkood ma laha doorashadan hore ee is-reereebka ah.

Codbixiyeyaasha aan ka Tirsanayn Xisbi Siyaasadeed
Codbixiyeyaashu ma aha khasab inay ku biiraan xisbi siyaasadeed. Saddex meelood hal dadka reer Maine kama tirsana xisbi siyaasadeed. Waa codbixiyeyaal aan “diiwaangashanayn”. Doorashooyinka hordhaca ah ee Maine qayb ahaan way furan yihiin, oo cod bixiyeyaasha aan diiwaan gashanayn waxay codayn karaan doorashooyinka hordhaca ah ee dookhooda ah. Sidoo kale waxay u codayn karaan musharaxiinta iyo su’aallaha cod bixinta doorashooyinka guud.
Xisbiya

da siyaasadeed qaarkood waxa laga yaabaa inayna baaxaddoodu dhannayn in lagu daro kaarka codbixinta ama ay qabsadaan doorasho is-reereeb ah. Xisbiyadaa yaryari waxay diiwaangelin karaan codbixiyeyaal murashaxiintoodana waxay ka caawin karaan inay ka qaybgalaan doorashada guud. Xisbiyadaa yaryar tusalaale ahaan waxa ka mid aha Xisbiga Isbahaysiga, Xisbiga Yankee, iyo Xisbiga Hantiwadaagga. Xisbiyada yaryar waxa lagu magacaabi karaa “qualifying parties” ama xisbiyada mudan.

Ku Biirista Xisbi Siyaasadeed

Codbixiyeyaashu waxay dooran karaan xisbi siyaasadeed marka ay isu diiwaangelinayaan codaynta. Waxa loo oggolyahay inay baddalaan xisbiga siyaasiga ah ee ay ka tirsanaayeen, ama ay ka baxaan xisbi siyaasadeed, laakiin waa inay sugaan 90 bari inay ka soo wareegto is diiwaangelintoodii ugu danbeysay. Codbixiyeyaasha ka baxa xisbi siyaasadeed looma oggola inay ka codeeyaan doorashada isreereebka xisbiga siyaasiga ah. Haddii aad rabto inaad beddesho xisbigaaga siyaasiga ah ama aad ka baxdo doorashada, waxaad haysataa 15 maalmood ka hor Maalinta Doorashada. Cod bixiyeyaasha cusub way isku diiwaan gelin karaan si ay u codeeyaan wakhti kasta, oo ay ku jirto Maalinta Doorashada!

Sannadkan 2024 Maine waxa ka jira 5 xisbi siyaasadeed oo la dooran karo:

Xisbiga Dimuquraadiga Maine

www.mainedems.org

(207) 622-6233

Xisbiga Cagaaran madaxabanaan Maine

www.mainegreens.org

(207) 518-7493

Xisbiga Libarateriyani Maine

www.lpme.org

(207) 518-7493

Xisbiga Jamhuuriga Maine

www.MaineGOP.com

(207) 622-6247

No Labels Party

www.nolabels.org

(202) 588-1990

INTA AADAN CODAYN

Halkeen ka codbixiyaa? Si aad u hesho meesha aad ka codaynayso:

- Wac xafiiskaaga Dowladda Hoose.
- Booqo bogga: www.maine.gov/portal/government/edemocracy/voter_lookup.php
- Codaynta ku soo dir Boosta (Faahfaahin dheerad ah ka fiiri bogga 12).

Xillima ayaan codayn karaa? Goobaha codayntu waxay furan yihiin 6:00 ilaa 10:00 ka subaxnimo Maalinta Doorashada. Xilliga furista magaalaooyinka oo dhani kama sinna. Dhammaan goobaha codaynta waxa la xiraa 8:00 fiidnimo. Waqtiyada xiritaanka doorashooyink a dowladda hoose way kala duwan yihiin.

Sideen uga fogaan karaa dadka badan? Goobaha codayntu waxay ugu dad badan yihiin 10:00 – 11:30 ka subaxnimo iyo 1:30 – 3:30 galabnimo.

Maxaan sameeyaa haddii aan magacaygu ku jirin liiska codaynta? Karraaniga codaynta ayaa ku caawinaya. Waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad is diiwaangeliso si aad u codayso. Waxa laga yaabaa in lagu diro goob kale oo cod laga bixiyo. Waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad riddo codayn khilaaf ku jiro.

Miyaan u baahanahay Aqoonsi? Waa inaad wadato aqoonsigaaga iyo caddayn cinwaankaaga sida biil guri haddii:

- Ay tahay markii kuugu horraysay ee aad codayso.
- Aad guurtay.
- Aad u baahan tahay inaad is diiwaangeliso maalinta doorashada.

Ha walwalin — qofkii xaq u leh inuu codeeyo marna lagama celin karo.

GOOBTAYDA CODAYNTA

Maxaan samaynayaa marka joojo goobta codaynta? Markaad tagto goobta codaynta xaafaddaada, waxaad karraaniga u sheegi doontaa magacaaga iyo cinwaankaaga. Magacaagu wuxu ku jiraa liiska haddii aad isu diiwangelisay codaynta.

- Karraaniga doorashada ayaa ku siinaya warqadda codaynta. Warqadda codayntu waa ta aad ku suntayso codkaaga. Waxaad geli doonta qol gooni ah si aad codkaaga u dhiibto. Waxaad warqadda codaynta ku ridi doontaa sanduuq ama mashiin.

Maxaa dhacaya haddii aan caawin u baahdo goobta codaynta? Weydiiso karraanigu inuu ku caawiyo haddii aad su'aal qabto. Karraaniyada doorashadu waxay kaa caawin karaan buuxinta ama warqad kale ayey ku siin karaan haddii aad u baahato. Ma noqon doontin qofka kaliya ee su'aal qaba!

Sideen u buuxin doonaa warqadda codaynta? Warqad kasta ee codayntu waxay bixisaa tilmaan si aad u buuxiso doorashadaada. Haddii aad wax su'al ah qabto, weydii karraaniga doorashada. Khasab ma aha inaad wax walba cod ka dhiibato. Kaliya qaybaha aad ka codayso ayuunbaa lagu xisaabi doonaa. Iska hubi warqaddaada doorshada. Haddii aad khalad samayso, waxaad waydiisan kartaa warqad kale.

Maxaan sameeyaa haddii aanan akhriyi karin warqadda? Waa lagaa caawin karaa. Saaxiibkaa ama qaraabada ayaa kaa caawin kara. Qofka ku caawinayaa Khasab ma aha in isagu codeeyo ama da'da uu gaaray. Shaqaalaha doorashadu wuxuu kaa caawin karaa warqaddaada doorashada. Shirkaddaada ama ururkaaga shaqaaluhu kaama caawin karo codaynta. Habka “ExpressVote” ayaa la heli karaa haddaad u baahan tahay far waaweyn ama aad rabto in lagu akhriyo warqadda doorashado.

CODAYNTA ADIGOO MAQAN

Waa mxay codaynta adigoo maqan?

- Khasab ma aha inaad tagto goobta codaynta si aad u codayso maalinta doorashada.
- Buuxi warqadda doorashada adigoo guriga jooga xafiiskaaga dowladda hoosena boosta ugu dir.
- Ama adiguba tag xafiiska dowladda hoose oo buuxin warqadda codaynta.

Haddii aad horay isu diiwaangelisay, waxaad codsan kartaa warqadda codaynta. Waa inaad sidaa yeesho ugu danbayn Khamiista ka horraysa maalinta doorashada.

Sideen ku heli karaa warqadda lagu codeeyo adigoo maqan?

- Weydiiso karraaniga magaaladaada inuu ku siiyo warqadda codaynta. Warqadaha codaynta adigoo maqan waxa badiyaa la diyaariyaa 30 bari ka hor maalinta doorashada.
- Internetka ku dalbo ka dalbo warqadda codaynta boggan: [🔗 maine.gov/cgi-bin/online/AbsenteeBallot/index.pl](https://www.maine.gov/cgi-bin/online/AbsenteeBallot/index.pl)
- Waxa kale oo aad u dalbi kartaa qof kale oo qoyska ka tirsan. Xafiiska dowladda hoose ayaa kuu sharxi doona qofka la dhihi karo waa qoyskaaga.

Maxaan ku sameeyaa warqadda codaynta anigoo maqan?

- Buuxi waqadda. Khasab ma aha inaad su'aal walba cod ka dhiibato, waa caadi haddaad ka tagto iyagoo bannaan.
- Boosta u dhig ama u gee warqadaha karraaniga dowladda hoose ee magaaladaada ugu danbayn 8:00 fiidnimo maalinta doorashada.

- Ha illoobin inaad saxeexo taariikhdana ku qorto bakhshadda korkeeda.
- Waxa laga yaabaa in magaaladaadu leedahay sanduuq lagu rido warqadaha codbixinta oo la dhigo guriga dowladda hoose hortiiisa si aadan ugu baahan boostada inaad ku dirto.

Sideen u codsan karaa inaan codeeyo anigoo maqan inta aan la gaarin khamiista ka horreysa maalinta doorashada? Waa inaad buuxiso codsi khaas ah sababahan midkood:

- Waxaad ka maqnaan doontaa magaalada maalinta doorashada sabab kadis ah awgeed.
- Waxaa ku haysa laxaad la'aan.
- Waxaad deggen tahay jasiirad mana soo gaari kartid goobta codaynta maalinta doorashada.
- Jirro ayaa ku haysa kamana soo guriga ama goobta caafimaadka.

Karraaniga baladkaagu waa in uu helo codayntaada ugu danbayn 8da fiidnimo maalinta doorashada.

Codaynta Joogtada ah ee Qofka maqan: Haddii aad tahay 65+sano jir iyo/ama aad la nooshahay naafanimada, waxaad u qalantaa inaad codsato heerka cod bixiyaha joogtada ah ee qofka maqan. Tan macnaheedu waxa weeye waxaad adeegsan kartaa in cod bixinta qofka maqan si otomaatig ah laguugu soo diro wareeg kasta oo doorashada ah. Waxaad codsanaysaa hal mar! La xidhiidh Karaanigaaga Magaalada si aad ugu biirto adeegan.

Sanduuqa codbixinta La Fududeeyey: Waxaad codsan kartaa warqadda cod bixinta qofka maqanaha ah si aad ugu codayso boostadda, ama cod bixiyayaasha qaba nafooyinka daabacaada (sida liidashada araga ama indho la'aanta ama liidashada garaadka), waxaad codsan kartaa cod bixinta la fududeeyey ee loo soo diri doono cinwaankaaga iimaylka. Codbixinta la fududeeyey waxay diyaar u noqonayaan cod bixiyayaasha ugu yaraan 30 maalmood ka hor Maalinta Doorashada.

CODBIXINTA DOORASHADA KALA SARREYSA

Waa maxay Codbixinta Doorashada Kala Sarreysaa?

Doorashada Kala Sarreysaa (Ranked Choice Voting) waxay suuragelisaa inuu qofku wax u doorto sida uu jecelyahay.

Siday u shaqeysaa Codbixinta Doorashada Kala Sarreysaa?

Codbixiyeyaashu waxay kala hormariyaan murashixiinta siday u kala jecel yihiin: codka koobaad, ka labaad ka saddexaad, iyo wixii ka sarreeya.

- Marka la tiryo waraaqaha codaynta oo dhan, haddii hal murashax helo in ka badan 50% codka darajada koobaad wuu guulaysanayaa.
- Haddii uu murashaxna heli waayo 50% oo ah codadka heerka koobaad, murashaxa hela codadka ugu yar ayaa loo aqoonsanayaa in laga adkaaday.
- Codbixiyeyaasha doortay murashaxa helay codadka ugu yar ayaa dabadeedna codkooda loogu darayaa qofka ay siiyeen heerka labaad ee doorashada.
- Waxa sidaa lagu wadayaa ilaa laba murashax oo kaliya soo haraan. Ka ugu cod bataana sidaasuu ku badinayaa.

Maxaan murashaxiinta u kala siinayaa cod darajooyin kala sareeya?




- Haddii laga adkaado qofkii aad siisay doorashada koobaad, codayntaadu waxay wali wax tari kartaa qofka aad siisay codka heerka ku xiga.
- Waxba yeeli mayso qofka aad ugu jeclayd inaad dadka kale siiso codad ka hooseeya. Codadkaas waxa kaliya oo la xisaabinayaa haddii murashaxaagii laga adkaado.

- Waxba u tari mayso murashaxii aad jeclayd haddii kaligii uun aad ku qorto warqadda doorashada. Mar walba doorashadaada heerka koobaad waa la la xisaabinayaa ilaa murashaxaaga laga adkaado.

Sideen isaga ilaaliyaa inaan khaldo warqaddayda doorashada?

Sakadda gudban ee kasta hal goobo kaliya ka calaamadi. Sakadda qotonta ee kasta hal goobo kaliya ka calaamadi. U codee doorasho kala darajo sarreeya intii murashax ee aad doonto. Khasab ma aha murashax aadan rabin inaad ku darto doorashada heerarka kala sarraysa. Haddii aad khalad sameyso, karraaniga weydiiso warqad cusub. Caawimaad waydiiso. Kaliga ma noqon doontid qofka su'aal qabaa!

Waakan tusaale sidaad u kala sarraysiin karto murashaxiinta aad jeceshahay:

	Doorashada 1aad	Doorashada 2aad	Doorashada 3aad
 Murashaxa koobaad	<input type="radio"/>	<input checked="" type="radio"/>	<input type="radio"/>
 Murashaxa labaad	<input checked="" type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>
 Murashaxa saddexaad	<input type="radio"/>	<input type="radio"/>	<input checked="" type="radio"/>

SARE: Tusaalaha, murashaxa 2aad ayaa ah doorashadaada koobaad, goobaabinta ku aaddan ayaana la buuxiyey. Murashaxa 1aad ayaa ah doorashada 2aad. Murashaxa 3aad ayaa ah doorashada 3aad.

Haddii aad hubto murashaxa aad u jeceshahay oo aad rabto inaad midkaa kaliya uun u codayso, markaa waxaad buuxinaysaa goobaabinta ku aaddan “doorashada 1aad” (ikhtiyaarka 1aad) oo kaliya. Inta kalena waxaad iskaga tagi kartaa iyagoo madhan.

Haddii aad doonayso inaad doorato laba murashax oo aad kala horraysiisay oo kaliya, waxaad buuxinaysaa goobaabinta ku aaddan “doorashada 1aad” iyo ta “doorashada 2aad” oo kaliya, waxaanad iskaga tagaysaa ta “doorashada 3aad” oo madhan.

WARAR KALE OO DHEERAAD AH

Sideen ku heli karaa karraaniga magaalada ama baladkayga? Waxaad ka heli kartaa cinwaanka iyo telefoonka karraaniga magaalada ama baladkaaga: maine.gov/sos/cec/elec/munic.html

Waxaa kale oo aad la xiriiri kartaa:

- ✉ Office of the Secretary of State
Division of Elections
101 State House Station
Augusta, ME 04333-0101
- ☎ (207) 624-7650
- @ cec.elections@maine.gov
- 🔗 maine.gov/sos/cec/elec/index.html




Haddii aad doonayso inaad xogogaal isku kalsoon noqoto, xogtaada codaynta ee shakhsiyeed ka fiiri Vote411.org.
Way fududdhay wayna dhibyartahay:

- Fiiri waxa ku qoran xaashidaada codaynta
- Hubi inaad diiwaangashan tahay
- Hel meesha aad codka ku bixin karto
- Arag meesha ay murashaxiintu ka taagan yihiin arrimaha
- Iyo waxyaalo kale oo badan!



Isticmaal QR code ka telefoonkaaga si aad u tagto Vote411.org.



Sanduuqa Dhaqaalaha ee Isutagga Dumarka Codeeya ee Maine wuxuu sameeyaa adeeg codayn iyo wacyi gelin bulshada ah. Waa urur dhexdhexaad ah, oo khayri ah oo isku taxallujiya ku wacyi gelinta bulshada arrimaha maammulka dadweynaha, taasoo:

- Dhista ka qaybqaadashada bulshada ee habka dimoqraadiyeed.
- Si dhexdhexaad ah u darasta arrimaha muhiimka u ah bulshada dhammaan heerarka dowladeed.
- U suurogelisa in dadku xal wanaagsan u helaan arrimaha siyaasiga ah ee dadweynaha taasoo ku salaysan aqoon iyo ka fogaanta colaaddaha.

Sharraxaadaha ku saabsan habka loo codeeyaa ma aha mid ka tarjumaya aragtida Sanduuqa Dhaqaalaha ee Isutagga Dumarka Codeeya ee Maine ama bahwadaagtiisa warfaafinta, kuwaasoo ay ka mid yihiin dugsiyada, maktabadaha, hay'adaha khayriga ah iyo ururrada kale.

**LEAGUE OF WOMEN VOTERS OF MAINE
EDUCATION FUND**

PO Box 18187
Portland, ME 04112

207-622-0256
info@lwvme.org
www.lwvme.org



@lwvme